

## XIRFADO BULSHADEED LOOGU TALA GALEY PETER HOBART EE 2000-2001

### 1-Xallinta khilaafaadka markii ay abuurmaan

- Waxaad tiraahdaa “mashaakil ayaa naga dhax dhacay waxaynu u baahan nahay in aan xallino.”
- Sheeg sheekadaada
- Qorsheyso waddada ugu haboon ee lagu xalliyo khilaafaadka
- Mid ka dooro

### 2-Hadalada

Markii adiga \_(magacow dhaqanka aad dhibsaneysid) waxaan dareemayaa....

### 3-Sida raaligelinta loo sameeyo

- Fiiri qofka
- Isticmaal cod daacad ah dhabna ah laakiin gafuurka ha taagin.
- Waxaad ku bilowdaa”waxaan rabaa inaan kaa raaligelyo...ama waxaan ka xumahay....
- Ha sameynin wax marmarsiinyo ah sabab u raadin
- (Ikhtiyaari: ma ogolaanaysaa raali gelinteyda?)

### 4-Ogolaanshaha raaligelinta

- Fiiri qofka ku raaligelinaya
- Dhageyso waxa ay/uu kuu sheegayo
- Isdeji. Ka fagoow talooyinka kaftanka ah
- U mahad celi qofka ku raaligeliya kuna dheh”waan kaa ogolaadey raaligelintaada, waadna ku mahadsan tahay waanka ka xumahaydii aad igu tiri.”

### 5-Markii aad qof si kedis ah aad u dhaawacdid

- Istaag dibna u laabo hal ama laba talaabo
- Si dhaqso leh waxaad ku tiraahdaa “waan ka xumahay, ulama jeedin in aan wax ku gaarsiiyo. Ma wanaagsan tahay?
- Haddii ay lagaga maarmaan tahay kaalmo uga raadi dadka waa weyn

### 6-Marka qof weyn uu ku weydiyo in aad wax sameysid (raacitaanka tilmaamaha)

- Fiiri qofka (sidi saaxiibkaa oo kale, indhaha ha ku gubin hana warwareeginin, indhaha ku hey intii aad hadleysid (si aad u ogaatid niyada qofka)
- Waxaad ku tiraahdaa wey wanaagsan tahay. Horey ugu jawaab, cod wanaagsan si fasiix ahna u hadal
- Shaqada lagu direy hor ka qabo. Sida ugu wanaagsan oo aad u qaban karo u samee. Haddii aad la kulantid wax dhib ah, gacantaada kor u qaad si lagu caawiyo
- Dib ugu laabo (ikhriyaari). Ogeysii qofka weyn in aad sameysey, hubso in aad si sax ah u sameysey.

### 7-Marka qof uu ku dhibaayo

- Haddii aysan qiimo lahayn, ama aan ahayn waxa saas u mihiimsan isku day in aad iska dhaaftid
- Haddii aysan qiimo lahayn isku day in aad isaga tagtid
- Haddii aan la joojin waxaad cod xoog leh ku tiraahdaa: iga jooji waxaan wey I dhibayaane
- Haddii aysan weli joogsan, dadka weyn kaalmo weydiiso

### 8-Sida loo wada hadlo

- Fiiri qofka
- Isticmaal cod wanaagsan
- Dhegeyso dadka waxa ay ka hadlayaan, adigoo hadalka ka dhaxgelayn
- U sheeg waxa aad ka hadleysid si khaas ah oo la fahmi karo
- Sabab u sameey waxa aad ka hadleysid
- Diyaar u ahow in aad ogolaatid dadka kale waxa ay ka hadlayaan
- Waxaad tiraahdaa waad mahadsan tahay adigoo muujinaya rabitaan iskaashi

### 9-Sida wax loo khilaaf

- Fiiri qofka
- Isticmaal cod wanaagsan
- U sameey shucuur la wadaagis ama hadalada aad daneyneysid
- Si gaar ah u sheeg waxyaabaha aad ku khilaafsan tahay
- Sabab u sameey
- Waxaad ku tiraahdaa waad mahadsan tahay